

Kitaabka Quduuska ah ee
loogu talo galay Carruurta
Soo-jeedinayaa

Ninkii Hodanka
Ahaa, Ninkii
Miskiinka
Ahaa



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: M. Maillot, Lazarus
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: M. Maillot, Sarah S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2025 Bible for Children, Inc.


Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.



Ciise wuxuu aad u garanayay inta badan hoggaamiyeyaasha diinta lacagta jecel yihiinin ka badan inta ay Ilaah lahaayeen.




Waxaa jiray nin taajir
ahaa oo xiran jiray dhar
aad u qurux badan oo
lacag qaali ah jooga.
Wuxuu u labisan
jiray sidii boqor.



Waliba ninkaa taajirka ahaa cunta fiican buu cuni jiray. Wakhti walboo wax la cunana waxay u ekeyd cunto xafladeed. Lacag fara bandanna wuu heystaay oo cuntaduu doonno ku iibsado quraac, qado iyo cashaba. - inta xiliyadaa u dhaxeysana inyar oo faakihees ku dara.



Albaabka hore ee gurigiisana waxaa fadhin jiray nin
miskiin ah, buka oo dawarsada. Magaciisana waxaa
la odhan jiray Laasoroos.



Miskiinkii Laasoroos ahaa jidhkiisa
nabaro booga ah ayaa ka buuxay.
Laga yaabe in uu cudurka lahaa.
Laga yaabe in nabaro jeexjeexan
oo booga ah ay micno u lahayd
noole kale. Laga yaabe inuu
xanuun badan hayay sababta oo
ah cunto wanaagsan
ma uusan heli jirin
sida caanaha.
Khudradda
ama hilibka.



Laasoroos cuntuu
doonayay. Wuuna
ku faraxsanaa
inuu ka
xaabxaabsado
reebreebka
cuntada ka
daaddaato
miiska ninkan
taajirka ah.




Mararaka qaar waxaa
agjoogi jiray eeyo
miskiinkii tuugsan
jiray. Wayna ka
leefleef jireen
waxayna u
ekeyd in
Laasoroos
aysan jirin cid
u ka caawisa
gaajada haysa.



Subax un buu,
Laasoroos soo
kici kari waaayay.
Miskiinkii
gaajeysnaa ee
saaxiib la'aanta
ahaa dawarsan
jirayna naftii
baa ka baxday,
Laasaroos wuu
dhintay.



Farxad baa u bilaabatay Lasaroos
isla kolkiii uu dhintay. Ciisa ayaa
yidhi Malaa'igihii baa u geeyey Ibraahim
laasaroos Ilaah baa ka raali noqday.



Ninkii taajirka ahaa isna wuu dhintay. Lacagtisii oo idilna maysan badbaadin karin noloshiisa.


Markii geerida ku timid, maysasan jirin cid ka joojin karaysay.




Waa la aasay ninkii hodanka ahaa. Laga-yaabee aas weyn in loo dhigay. Laga-yaabee dadku inay aamaanayen ninkan taajirka ahaa inuu xariif caqli badan ahaa oo guuleystay. Ninkii taajirka ahaa naarta ayaa la geeyey.




Naartii dhexdeeda ayuu oohin kala soo dhex
qayliyey, "Abbo Ibraahimow ii soo dir Laasaroos
inuu fartiisa caaaradeeda biyo ku tiinbiyo oo
arrabkayga ku qabowjiyo, wayuo aniga ololka yaan
ku silcayaa."





"Intaad nooleyd wax walba
waad haysatay oo Laasaroos
waxba ma haysan," Ibraahim
wuxuu soo xusuusiyey ninkii
taajirka ahaa. "Haddeer
Laasaroos halkan ayaa lagu
raaxeysiinayaa, adiga se
waad silceysaa." Cidn kam
soo gudbi karto bohosha
weyn ee inoo dhaxaysa
idinka iyo anaga.




"Laasaroos u dir gurigeygii ha u digee shantaydii walaal," ninkii taajirka haa sidaa buu ku baryootamay. "Ma doonayo iyaga inay meeshan silica leh ku dambeeyaan."



"Walaalahaa waxsay haystaan Ereyga
Ilaah, "Ibraahim baa sidaa ugu
jawaabay. Haddii aysan walaalahaa
shanta ah haddii aysan aaminsaneen
Kitabka Qudduusk,
ma aamini doonaan
haddii Laasaroos
dib uga soo
laabto geerida.



Markii uu ciise dhameeyey sheekadii ninkii taajirka
ahaa iyo Laasaroos, laga yaabee culimadii iny
isweyddiiyeen qudhooa, "Miyaan jeclahay
taajirnimada in ka badan inaan jeclaado
Ilaah?" Iminka way ogaadeen
waxa dhici kara haddii iyagu
ay u dhug-yeelan Ereyga Ilaah.



Ninkii Hodanka Ahaa, Ninkii Miskiinka Ahaa

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Luukos 16


"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130



Dhammaad



44



60



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Cigaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro cigaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

